Allaha u naxariisto nin wanaag badan haduu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba

Jaabir Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey in Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Allaha u naxariisto nin wanaag badan haduu wax iibinaayo, haduu wax soo gadanaayo, iyo haduu gar naqsanaayoba".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu Raxmad ugu duceeyey Qof kastoo Sahlan oo Deeqsiya oo Sakhi ah markuu wax iibinaayo. Kuma adkeeyo sicirka Qofka wax ka iibsanaya, wuxuuna kula dhaqmaa akhlaaq fiican. waa Qof Sahlan oo Deeqsi ah oo Sakhi ah oo markuu wax iibsanayo ma bakhso mana yareeyo qiimaha Badeecada. Waa Qof Sahlan oo Deeqsi ah oo Sakhi ah markuu dayntiisa, waydiisanayo, kuma adkeeyo Faqiirka iyo kan Baahan, balse wuxuu u waydiiyaa si fudud oo naxariisi ku jirto, wuuna ka sugaa kaan haysan.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3716